# Fahanka Gu'ga Ardaygaaga 2025 ee Maine ayadoo la Adeegsanaayo Warbixinta Buundada Imtaxaanka

## Cabirka Buundada Maine

Jaantusyada midabka leh, ee jiifa ee ku qoran warbixinta ardaygaaga ayaa muujinaaya buundada heerka ardaygaaga ee Maine. Buundadaan ayaa cabiraysa dedaalka ardaygaaga ee ku aadan imtaxaankaan ayadoo laga eegaayo xirfadaha muhiimka ah ee akhriska iyo xisaabta ee heerka fasalkiisa marka loo eego Heerarka Buundada Guud ee Gobalka.

Imtaxaanka akhriska ee fasalka 5-aad wuxuu cabiraa xirfadaha sida:

- Adeegsiga faahfaahinta qoraalka si looga jawaabo su'aalaha ku saabsan sheekooyinka, ciyaaraha, gabay-yada, iyo qoraalka xogta.
- Khulaasaynta qoraallada ayadoo laga hadlaayo fikradaha ugu muhiimsan iyo faahfaahinta guud.
- Qiimeynta iyo isku eegista qaab dhismeedka sheekooyinka, gabay-yada, iyo qoraalka xogta.
- Isku eegida iyo is barbardhiga qodobada muhiimka ah ee ku jira labo qoraal oo isku mawduuc quseeya.
- Adeegsiga tusmooyinka mawduuca iyo agabka tixraaca si loo ogaado macnaha erayada.

Imtaxaanka xisaabta ee fasalka 5-aad wuxuu cabiraa xirfadaha sida:

- U qaybinta lambarada dhamaystiran qaybiyaasha 2 god ah.
- Iskudarka, kala jarida, isku dhufashada, iyo u qaybida jajabka.
- Fahanka booska tirada leh dhibicda ilaa godka boqolaad.
- Iskudarka, kala jarida, isku dhufashada, iyo u qaybida tirooyinka dhibicda wata.
- Abuurista fahanka xajmiga (cadadka badka sheey qabsanaayo).

Cabirka Buundada Maine ayaa la xiriirta heerka guusha oo qeexaaya sida waxqabadka ardaygu u waafaqsan yahay himilooyinka gobalka. Heerarka guusha ayaa Aad uga Hooseeya Filashada Gobalka, Ka Hooseeya Filashada Gobalka, Ku siman Filashooyinka Gobalka, iyo Ka Sareeya Filashooyinka Gobalka.

## Aalada Fahanka Heerka Guusha

Aalada Fahanka Heerka Guusha ayaa ku siinaysa xogta faahfaahsan ee heerarka gaarka ah ee waxbarashada oo lagu qiimeynaayo heerka fasal kasta iyo sida heerarkaan loogu kala qaybiyo xirfadaha kaladuwan ee heerka kasta oo guusha kamid ah.

*Hel Aalada Fahanka Heerka Guusha*